



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR SAXAFADDEED 004/2010

Ergeygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud oo ku baaqay in la joojiyo faragelinta dibadeed ee arrimaha Gudaha ee Soomaaliya

Nayroobi, 1da Maarso 2010 – Taariikhdu markay ahayd 30kii Janaayo 2010, Madaxweyne Sheekh Shariif Sheekh Axmed wuxuu u dabaaldegay sannadguuradii kowaad ee intuu xafiiska haayey. Sidoo kale, shalay waxay ahayd sannadguuradii kowaad ee Cumar Cabdirashiid Cali Sharmaarke uu haayey xafiiska asaga oo ah Raiisul Wasaare “Sannadkii la soo dhaafay madaxda (Madaxweynaha iyo Raiisul Wasaaraha) iyo Gudoomiyaha Barlamaanka, Sheekh Adan Maxamed Nuur (Madoobe), waxay dadkooda iyo gobolkaba u moojiyeen hogaan adag oo mideysan oo ay wax oga qabanayeen dhibaatooyinka fara badan ee ummaddooda haysta”, sidaas waxaa yiri Ergeygga Gaarka ee Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya.

“Munaasabada waxaan si niyadsami ku jirto ugu hambalyaynayaa uguna dhiirigelinayaa inay sii wadaan hogaankooda mideysan. Adkeysigooda iyo kartidoodaba waxay guul u tahay Golaha Wasiirrada, Barlamaanka iyo Ciidamada Amaanka. Bulshada rayidka iyo ganacsataduba waxay muddada aan soo sheegnay muujiyeen waddaniyad. Inkastoo ay jireen caqabado waaweyn, sida waayo aragnimo siyaasadeed la’aanteed, amaan darro, mishaaraadka oo aan si joogta ah loo bixinin iyo dhibaatooyin kale oo fara badanba, haddana hoggaanka qaran ee Soomaaliya wuxuu u hawlgalay si wadajir ah, wuxuuna si iswaafaqsan oo midaysan ula xiriiray dadka siyaasad ahaan ka soo horjeeda.

“Muddo sannad gudaheed ah, madaxda iyo hay’adaha Soomaaliyeed – Madaxweynaha, Ra’iisal Wasaaraha, Gudoomiyaha Barlamaanka, Xubnaha Golaha Wasiirrada, Barlamaanka, Ciidamada Amaanka – dhammaantooduba si adag ayay u hawlgaleen si dib loogu soo hanto xurmadii iyo sharaftii waddanka iyo dadka Soomaaliyeed. Waxay si tifaftiran u soo bandhigeen miisaaniyad qaran, waxayna dib u dayactireen dhowr hay’adood iyo dhismo, waxayna wadahalal la galeen dadkii siyaasad ahaan ka soo horjeeday, waxayna albaabada wadahalalka u fureen dhammaan dadka Soomaaliyeed ee wadahalalka ka doorbida dagaalka. Sidoo kale waxaan u hambalyeynayaa madaxda Puntland iyo Somaliland.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (Nayroobi, Kenya)

Tel. +254 733902020 ama +254 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website): www.unpos.unmission.org



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

Waxaan jeclaan lahaan inaan ka faa'idaysto munaasabaddan ah sannadguuradii ka soo wareegtay dhismaha Xukuumadda Soomaaliyeed inaan ugu baaqo ummadda Soomaaliyeed inay sii wadaan taageerada ay u hayaan madaxweynaha iyo madaxda kale ee qaranka. Waxaa waajibaad xagga siyaasada, bulshada, diinta, iyo anshaxa ah naga saaranyahay si aan dib ugu soo nooleyno muuqaalkii iyo magacii wanaagsanaa ee Soomaaliya. Waxaan sidoo kale xukuumadaha dalalka shisheeye ugu baaqayaa inay joojiyaan faragelinta arrimaha gudaha ee Soomaaliya. Maanta, faragelin siyaasadeed ee dibadda ah oo lagu sameeyo Soomaaliya waxay sii kicinaysaa deganaansho la'aan, taasoo tababaysa sii socodka kalluumeysiga sharci darrada ah, burcad badeedka iyo dembiyo dhaqaale ee kale.

“Arrintani waxay i siinaysaa fursad kale oo aan si cad ugu aqoonsanayo uguna mahadcelinaya kaalinta wax dhisidda leh ee waddanka Turkiya ku taageerayo deganaanshaha siyaasadeed, dibudhiska iyo horumarinta Soomaaliya. Kaalintan waxdhisidda leh ee Turkiya waxaa soo dhoweynaya dowladda Soomaaliya, Qaramada Midoobay iyo dhammaan saaxiibada dhabta ah ee taageera nabadda Soomaaliya.”

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (Nayroobi, Kenya)

Tel. +254 733902020 ama +254 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website): www.unpos.unmission.org